Waxaa haboon in la ogaado waxa uu kulanku ku saabsanyahay

Hawl wadeenadka aad kula hadleyso aaladaha la isku arko waxaa saaran waajib la mid ah kan kulanada caadiga ah in uu qariyo sirta shaqsiga.

Hawl wadeenada aad hadli doonto waxaa ay kaa soo wici doonaan telefoonkaaga gacan (moilkaaga), haddii kulanka aalada la isku arko uu sidii la rabey u shaqeyn waayo.



Qiimha lacagta ee kulanaka la adeegsado aaladaha la isku arko iyo kulanada kale ee caadiga ah waa mid isku mid ah. Kulanada dhalinyarada ay da’doodu ka yartahay 19 sanno iyo carruurta waa mid bilaa lacag ah, sidoo kale kulanada shaqsiyaadka ay da’doodu ka weyntahay 85 sanno waa mid bilaa lacag ah. Dadka ay da’doodu u dhaxeyso 19 sanno iyo 85 sanno waxaa loo soo diri doonaa faktuuro kulanka ka dib. Haddii aad haysato kaadhka bilaa lacagta la isku daweeyo (frikort), waa mid xitaa khuuseeya kulanada la adeegsado aaladaha la isku arki.



Haddii aana ka qayb qaadan doonin kulanka waa in aad na soo wargaliso 24 saacadood ka hor wakhtiga kulanka. Markaas hadii aad sidaas sameyso uma baahnid in aad wax lacag ah bixiso.

Laakiin haddii aanad na soo wargalin wakhtigii loogu talogaley waa in aad bixisaa lacag. Arinkani waxaa uu khuseeyaa carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn intaba. Waxaa aan soo diri doonaa faktuuro.

Fadlan la xidhiih qofkii kuu soo direy warqada wicista haddii aad qabto wax su’aalo ah.

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN
SAHLGRENSKA UNIVERSITETSSJUKHUSET